IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 17aad Muqdisho 18ka Jannaayo 1989 L. 1 R 1

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka l aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

M W

## QAYBTA KOWAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 1 ee 6 Nof. 1988, Magacaabid Guddoomiye Degmo. Bog; 25

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 2 ee 11 Nof. 1988, Magacaabid G/ye Maamul Degmo. » 26

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 3 ee 12 Nof. 1988, Magacaabid G/yaal Maamul Degmo. » 27

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 4 ee 20 Nof. 1988, Mag/bid Gud/ye Maamul Gobol iyo Degmo. » 28

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

QAYBTA SAD/XADA

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 5 ee 26 Nof. Dis. 1988, Magacaabid Nootaayo. » 29

MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.12.88, Lumid Buug Kayd L. 3.164 ku qoran Xaawo Cilmi Jaamac L. 18 » 30

MAXKAMADDA G. BANAADIR 13.12.88, Lumid J.W.L. 0054756 ku qoran Xasan Madoobe Xareed L. 19 » 31

MAXKAMADDA G. BANAADIR 21.12.88, Lumid J.W.L. 0267624 ku qoran Maxamed Axmed Maxamed L. 20 » 32

MAXKAMADDA G. BANAADIR 2.1.89, Lumid J.W.L. 0270593 ku qoran Sheekh Maxamed Sh. Cabdiraxmaan L. 21 » 33

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.12.88, Lumid B/Kayd L. 8000/7 ku qoran Istiqaal Cabdullaahi Faarax L. 22 » 34

MAXKAMADDA G. BANAADIR 2.1.89, Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Maxamed Maxamuud Sheekh L. 23 » 35

MAXKAMADDA G. BANAADIR 2.1.89, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Maxamed Maxamuud Sheekh L. 24 » 36

MAXKAMADDA G. BANAADIR 22.12.88 Lumid Jeeg War. L. 1070986 ku qoran C/raxmaan Xasan C/dule L. 25 » 37

MAXKAMADDA G. BANAADIR 14.11.88 Lumid Jeeg War. L. 1191900 ku qoran Jeylaani Aabnuur Muunye L. 26 » 38

MAXKAMADDA G. BAY, 12.1.89 Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Maxamed Saciid Maxamed L. 27 » 39

MAXKAMADDA G. W/GALBEED 15.12.88 Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Cabdi Khaliif X. Yuusuf L. 28 » 40

QTYBTA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 1 ee 6.11.88, Magacaabid Guddoomiye Degmo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS Qodobkiisa 82/14;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 6 ee 12.2.80 ee Golayaasha Shacbiga Deegaanada, Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay in Degmada A/Yabaal loo magacaabo Guddoomiye Maamul Degmo;

ISAGOO DHEGEYSTY: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERIYEY

Qodobka 1aad

Waxaa loo magacaabay G le Xasan Caliyow Niise inuu noqdo Guddoomiyaha Maamulka Dawladda Degmada A/Yabaal.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

Waan aragnay ee diiwaangelinay
Diiwaanka Lr. 1 bogga Lr. 59
Muqdisho, 18 Dec. 1988
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 6.11.1988

MADAXWEYNAHA JDS

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 2 ee 17.11.1988, Magacaabid Guddoomiyeyaal Maamul Degmo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qodobka 82/14 ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 6 ee 12.2.80 ee Golayaasha Shacbiga Degaanada, Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Inay lagama maarmaan tahay in la -ameeyo magacaabid Guddoomiyeyaal Maamul Degmo;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERIYEY

Qodobka 1aad

Saraakiisha magacyadooda soo socda waxaa loo magacaabay Guddoomiyeyaal Maamul Degmo mid waliba Degmada ku hor qoran:

1. G/le Shukri Weyrax — Degmada Jariiban
2. G/Dhexe Nadiir Faarax — Degmada Caluula
3. J/le Axmed Cali Kooshin — Degmada Goldogob
4. Dhamme Ismaaciil Jaamac Aadan — Degmada Jalalaqsi
5. G/le Cabdulle Weheliye — Degmada Gaalkacyo

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Waan aragnay ee diiwaangelinay
Diiwaanka Lr. 1 bogga Lr. 50
Muqdisho, 29 Nov. 1988
Hantidhowraha Guud 6
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 17.11.1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 3 ee 12.11.1988, Magacaabid Guddoomiyeyaal Maamul Degmo.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82/14 ee Dastuurka JDS;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 6 ee 12.2.80 ee Golayaasha Shacbiga Degaanada, Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka;

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay lagama maarmaan tahay in kala beddelid iyo magacaabid Guddoomiyeyaal Maamul Degmo;

ISAGOO DHEGEYSTAY: Soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha.

WUXUU XEERIYEY

Qodobka 1aad

In Saraakiisha magacyadooda soo socda qaar loo beddelay, qaarna loo magacaabay Guddoomiyeyaal Maamul Degmo mid waliba Degmada ku hor qoran:

| | |
|---|---|
| 1. Cusmaan Axmed Faarax (Baalataag) | Degmada B/Weyne |
| 2 Maxamed Axmed Xasan | Degmada Baki |
| 3. Cabdi Cabdullaahi Riiraash | Degmada Gebiley |
| 4 Cumar Xaashi Aadan | Degmada Jilib |
| 5 Saciid Faarax Cigaal | Degmada Afmadow |
| 6. Jaamac Maxamed Jaamac | Degmada Boorame |
| 7. Cabdulqaadir Maxamuud Cali | Degmada Jowhar |
| 8 Cabdul Aadan Bootaan | Degmada Balcad |

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda.

Waan aragnay ee diiwaangelinay
Diiwaanka Lr. 1 bogga Lr. 49
Muqdisho, 29 Nov. 1988
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

Muqdisho, 12.11.1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 4 ee 20.11,1988, Magac.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 82/14 ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 6 ee 12.2.88 ee Go'ayaasha Sha cbiga Deegaanka Maamulka Gobollada & Degmooyinka.

ISAGOO ARKAY: Sharci Lr. 30 ee 30,7,84 ee Lagudhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

ISAGOO TIXGELIYEY: Baahida Loo qabo in Gobolka W. Galbeed iyo Deg. Qoryooley Loo magacaabo Gud/yaal Maamul.

ISAGOO DHEGEYSTAY: Soo Jeedinta W/ARR. Gudaha.

WUXUU XEERIYEY

Qodobka 1aad

Saraakiisha Magacyadooda Soo Socda Waxaa Loo kala Magacaabay qof walba xilka ku hor qoran.

1. G/Sare Khaliif Maxamuud Warsame Guddoomiyaha Maam. Dowl. Gobolka W/Galbeed.

2. J/le Ismaaciil Faarax Jaamac Guddoomiyaha Maamulka Dawladda Degmada Qoryooley.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho 20.11.88.

aabid Guddoomiye Maamul Gobol iyo Degmo.
Waan Aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka L. 1 Bog. 51 29 Nof. 1988
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

MADAXWEYNAHA J.D.S.
J/le Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 5 26 Dis. 1988 Magacaabid Nootaayo.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 82aad ee Dastuurka J.D.S.
ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lr. 8 ee 15,2,61 iyo Lr. 1 ee 2.3.62 kuna saabsan howsha Nootaayada,
ISAGOO ARKAY: Qodobka 2aad ee Sharciga Lr. 7 ee 2.2.88 oo Awood u siinaya Madaxweynaha J.D.S. inuu si toos ah u magacaabo Notaayo Qofkii mudan.
ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyay Wasiirka Garsoorka iyo Arr. Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

J/le Dr. Cabdi Maxamed Yuusuf Waxaa Loo magacaabay Notaayo, Wuxuuna hawshiisa Nootaayanimo ku tulinayaa Magaalada Muqdisho.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla markii uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana Lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 26 Dis. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
J/le Maxamed Siyaad Barre

WAAN ARAGNAY EE DIIWAAN GELINAY
DIIWAANKA L. 1 Bob 54
Muqdisho, 27.12.88
Hantidhowraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Xaawo Cilmi Jaamac;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lr. 3.184 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 24.155.41 ku qoran magaca J.le Xaawo Cilmi Jaamac sida ku cad warqadda lam. 3458 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1968

WUXUU XEERIYEY

in la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 3 184 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 24.155.41 ku qoran magaca J.le Xaawo Cilmi Jaamac.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad in ay siiso J.le Xaawo Cilmi Jaamac lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 24.155.41 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 18

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xasan Madoobe Xareed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J.W. Lr. 0054758 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 18.800 ku qoran magaca J.le Somaali Airlines sida ku cad warqadda lam. 14808 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar;

HADDU UARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J.W. Lr. 0054758 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 18.800 ku qoran magaca Somali Airlines.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar in ay siiso J.le Xasan Madoobe Xareed lacagta ..adeedu tahay Sh.So. 18.800 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa..ina Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 13.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

I. 19

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Axmed Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0267824 oo laga sameeyey Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 142.700 kuna qoran magaca Somali Airlines sida ku cad warqadda lam. 15245 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0267824 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 142.700 kuna qoran magaca Soomaali Air-lenes lagana sameeyey Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Jaalle Maxamed Axmed Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 142.700 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 20

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Sheekh Maxamed Sh. C/raxmaan;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0270593 oo laga sameeyey Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh So. 142.800 kuna qoran magaca Somali Airlineys sida ku cad warqadda lam. 15557 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU AHKAY: Qod, 69 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0270593 kuna jirto lacag dhan Sh So 142.800 kuna qoran magaca Somali Air-lines lagana sameeyey Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wardhiigley ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Sheekh Maxamed Sh. C/raxmaan lacagta cadadkeedu yahay Sh So 142.800 oo ah bedelkii Jeegga War oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta ma'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 2.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

r, 21

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Istiqaal Cabdullaahi Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Buug Kayd Lr. 8000/7 oo laga sameeyey Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 400.843.10 sida ku cad warqadda lam. 15405 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed; L. 2aad

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 8000/7 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 400.843.10 kuna qoran magaca Istiqaal Cabdullaahi Faarax laga sameeyey Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 2aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Istiqaal Cabdullaahi Faarax lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 400.843.10 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 22

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Maxamuud Sheekh;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga Wareega oo lam. kala yihiin:

J/W. 0131135 ayna k ujirto lacag dhan Sh.So. 500.000
J/W. 0131136 ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 500.000
J/W. 0131137 ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 500.000

laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryooleey ayna ku jirto lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh So. 1.500.000;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee Lam. 0131135—0131137, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryooleey kuna jirto lacag dhan Sh.So. 1.500.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Maxamuud Sheekh.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryooleey in ay siiso J.le Maxamed Maxamuud Sheekh lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh.So. 1.500.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 2.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Maxamuud Sheekh;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen Jeegagga Wareega oo lam. kala yihiin:

J/W. 0102339 ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 50.000

J/W. 0102340 ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 50.000

laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryooleey kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega oo Lam. kala yihiin J/W. 0102339—40 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qoryooleey, kuna jirto lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Maxamed Maxamuud Sheekh.

**WAXAA LA AMRAYAA**

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Qoryooleey in ay siiso J.le Maxamed Maxamuud Sheekh lacagta cadadkeedu dhan yahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku xusan, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 2.1.1989

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 24

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
## QAYBTA MADANIGA
## GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cumar Xaaji Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 1070986 oo laga sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Cabdiraxmaan Xasan Cabdulle sida ku cad warqadda lam. 15190 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 9.9.1962;

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1070986 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qiran magaca J.le Cabdiraxmaan Xasan Cabdulle lagana sameeyey Laanta Wadajir ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

### WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Wadjair ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Cumar Xaaji Maxamed lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 100.000 oo an bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.12.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 25

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Abuubakar Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1191900 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 ku qoran magaca J.le Jeylaani Abanuur Muunye sida ku cad warqadda lam. 13624 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1191900 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 ku qoran magaca J.le Jeylaani Aba Nuur Muunye.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar in ay siiso J.le Axmed Abuubakar Axmed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.00 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 14.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 26

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY EE BAYDHABO

L.MGB/16/89 Baydhabo, 12.1.89

UJEEDDO:- Baafin Jeegag Wareega oo lam. kala ah:- 1318080 kuna qoran lacag dhan Sh.So. 100.000 iyo Jeegga Lam. 1318081, kuna qoran Sh.So. 100.000 iyo Jeeg Lam. 0526859 oo kuna qoran Sh.So. 50.000 oo Shillin.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G. BAY

MARKUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2 Lumidda Jeegagga Wareega ee Lam. kala yihiin:- 1318080, 1318081, 0526859, oona ku wada qoran Lacag dhan Sh.So. 250.000 Bangiga Ganacsiga ee Laanta Buulo Xaawo.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood, maalinta Dekereetada lagu soo Shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegagga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Maxamed Saciid Maxamed ama qof isla asaga ka sita Wakaalad Sharci ah, iyadoo la sugaayo mudada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

GUDDOOMIYAHA MAX. G. BAY
(Aadan Wardheere Cali)

L. 27

MAXKAMADDA G. W/GALBEED

MGH/35/88 Hargeysa, 15.12.88

03. Degreeto Cusboonaysiin Jeegag W. oo lumay

| J.W.Lr. | Taard. | Sh.So. | Laanta | Magac | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 0089666 | 19.5.88 | 500.000 | 1/Har. | Cabdi | Khaliif | X. | Yuusuf |
| 0089667 | » | 500.000 | » | » | » | » | » |
| 0089668 | » | 500.000 | » | » | » | » | » |
| 0089669 | » | 331.250 | » | » | » | » | » |

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga uu Maxkamadda u soo qortay Cabdi Khaliif Xaaji Yuusuf ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo Jeegagga Wareega ee ka lumay korna ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Hargeysa ee la qoray 27.11.88 ee uu u kala diray Laamihiisa iyo Xisaabiyaha Guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa lambarkeedu yahay 39 ee la qoray 13.12.88 ee Bangiga ku soo caddeeyey in ay Jeegaggaas Wareega ay iska leeyihiin astaamaha kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: In lacagta ku qoran Jeegaggaas uu iska leeyahay Cabdi Khaliif Xaaji Yuusuf;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.1965.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeegaggaas Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo, loona cusboonaysiiyo ninka la yidhaahdo Cabdi Khaliif Xaaji Yuusuf cusboonaysiintana isaga gacanta laga saaro ama ciddii isaga awood buuxda ka haysata muddo 15 beri ah gudahood.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Hargeysa in uu nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga irdihiisa si ciddii haysata Jeegaggaas War. ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonayaan.

GUDDOOMIYAHA MAX. G W/GALBEED

(Maxamed Yuusuf Caynaan)